

**Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland**  
**Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta**  
**Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah**  
**Waaxda Tirokoobka**



**TUSAHA SICIRKA ADEEGA DAMBIISHA**  
**SABTEEMBAR 2019**

## Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha Ee Bisha Sabteembar, 2019

### *Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha*

Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha qeybaheeda kala-duwan ayaa intii lagu guda jiray bishii Sabteembar kor uga soo kacay 83.7 gaarayna 84.3. Isbedelka bishii Sabteembar ayaa ah kor u kac dhan 0.8 boqolkiiba, halka uu bishii ka horeysay ee Agoosto hoos u dhacay 0.6 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishaan sida xoogan u siyaaday marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: qaybta caafimaad (+2.7%), Agabka Dhaqanka iyo Madadaalada (+2.7%), qaybta Qalabaynta iyo Dayactirka Guryaha (+2.5%), Cunada iyo Cabitaanka (+1.2%), qaybta kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska cunada iyo Shidaalka (+0.6%) iyo Makhaayadaha iyo Huteellada (+0.2%).

Dhanica kale, hoos u dhac ku yimid sicirka: qaybta mukhaadaraadka Tubaakada, Jaadka iyo Sigaarka (-2.6%), Dharka iyo Kabaha (-1.0%), ayaa dheelitiray isbeddelka togan ee ku dhacay sicirka badeecadaha kor ku xusan, taas oo horseeday isu dhawaanshaha heerarka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha iyo jiiitimeed ku sugnaasha Jaantuuska dhaqdhaqaaqa Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.

### **Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada heerka sicir bararka iyo dhaq-dhaaqa Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.**


#### **All Groups CPI**

##### **INFLATION RATE**

Percent change over twelve months

##### **INDEX**

Index = 100 @ 2015




Source: Puntland Statistics Department

### **Jadwalka 1aad: Heerka Sicir bararka iyada loo eegayo TSD- Sabteembar 2019 (2015 = 100)**

<b>Tusaha Sicirka Dambiisha, Agoosto 2019</b>	
Tusaha (bishan) = Sabteembar 2019	84.3

Tusaha (bishii hore) = Agoosto 2019	83.7
Tusaha (sanadkii hore isla bishan) = Sabteembar 2018	75.3
Isbedelka % bilaha ah = Agoosto 2019/Sabteembar 2019	0.8
Isbedelka % sanad laha ah (heerka sicir bararka) = Sabteembar 2019/ Sabteembar 2018	11.9

**Jaantuuska 2aad: Tusaha Sicirka Dambiisha: Isbedellada ugu waaweyn ee billaha ah iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala saaridda qaybaha maciishda.**




**Qaybaha isbedellada togan ee ugu badan ku yimid bisha Sabteembar, 2019.**

- Sicirka qaybta **Caafimaadka** ayaa kordhay 2.7% bishii Sabteembar 2019 marka la barbardhigo bishii Agoosto oo uu jiray hoos dhac dhan 3.3%. badeecadaha ugu wacan kor u kacan ayaa kala aha: agabka caafimaadka (3.8%) iyo adeegyada daweynta cisbitaalka (9.7%).
- Agabka **Dhaqanka iyo Madadaalada** ayaa bishii Sabteembar 2019 siyaaday 2.7%, halka bishii ka horeysay ee Agoosto hoos u dhacay 10.5%. Kor u kaca bishaan ayaa loo aanaynayaa qalbka

warbaahinta loo isticmaalo sida qalbka wax lagu sawiro waxna lagu duubo oo siyaaday (4.0%) iyo joornaalada iyo buugaagta oo siyaaday (0.5).

- Sicirka **Qalabka iyo Agabka Guryaha iyo Hagaajintooda** ayaa bishii Sabteembar kordhay 2.5% marka la barbar-dhigo sicir barar gaaraya 2.3% oo loo diwaan-gashay bishii Agoosto. Badeecadaha sida aadka ah sicirkoodu u kacay ayaa kala ah: qalabka fududaynta guryaha sida talagadaha, feerada, iyo makiinada cabitaanka (2.7%),maacuunta (3.3%) iyo agabka nadaafada guryaha (4.9%).
- Qaybta **Cunada iyo Cabitaanka** ayaa siyaaday bishii sabteembar 2019 (1.2%) marka la barbar-dhigo bishii agoosto oo uu hoos dhacay (2.3%) qiima kororkan waxaa loo aanaynayaa kaluunka oo siyaaday (7.4%), qudaarta oo korortay (3.2%) iyo sonkorta, jaamka, malabka, iyo shukulaatada oo siyaaday (4.0%).
- Sicirka qeybta **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada, Gaaska Cunada iyo Shidaallada kale** ayaa bishii Sabteembar 2019 siyaaday 0.6%, halka bishii ka horeysay ee Agoosto kordhay 1.9%. Kor u kaca bishaan waxaa sababay korontada iyo shidalka oo siyaday (2.1%).



#### Qaybaha isbedellada taban ee ugu badan ku yimid bisha Sabteembar, 2019.

- Sicirka qaybta **Mukhaadaraadka Tubaakada, Jaadka iyo Sigaarka** ayaa hoos u dhacay -2.6% bishii Sabteembar 2019 marka la barbardhigo bishii Agoosto oo uu jiray koror dhan 6.7%. hoos u dhacan waxaa loo aanaynayaa Tabaaco dhacday (-3.1%) iyo jaadka (-1.5%).
- Qaybta **Dharka iyo Kabaha** ayaa hoos u dhacay bishii Sabteembar 2019 -1.0% marka loo barbar dhigo bishii Agoosto oo korortay 2.7%. Hoos u dhaca bishan waxaa sababay dharka oo qiimo jabay (-0.6%) iyo kahaba (-2.3%).

### *Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee sanad dhamaadka Sabteembar 2019*

Isbedelka sanadlaha ah ee sicirka (heerka sicir bararka) 12-kii billood ee u dhaxeeyey Sabteembar 2018 iyo Sabteembar 2019 ayaa ahaa 11.9 boqolkiiba, halka sanad kii ka horeeyey ee Agoosto 2018 iyo Agoosto 2019 uu kordhay 11.1 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaaday 12-kii billood ee u dhaxeysay Sabteembar 2018 iyo Sabteembar 2019 ayaa kala ah: qaybta **Gaadiidka** (+19.5%), **Dharka iyo Kabaha** (+18.9%), qaybta **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada, Gaaska Cunada iyo Shidaallada kale** (+15.9%), qaybta **mukhaadaraadka Tubaakada, Jaadka iyo Sigaarka** (+14.6%) iyo qaybta **Caafimaadka** (+13.0%). Guud ahaan, isbedelka Sicirka qeybaha kala duwan ee maciishda ee 12-kii billood u dambeeyey (Sabteembar 2018-Sabteembar 2019) ayaa ahaa mid togan marka laga reebo isgaarsiinta oo celcelis ahaan hoos u dhacday (0.1%).

### **Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo si gaara loo eeggay, Sabteembar 2019**

**Qaybta cuntada iyo cabitaanada iyo qaybta Kirada Guryaha, iyo Adeegyada Biyaha, Korantada, Gaaska iyo shidaalada kale** ayaa hadda ah qeybaha ugu muhiimsan dambiisha tusaha Quutaha marka loo eego saamiga ay ka yihiin kharshaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahaan inay saamaynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.

Sicirka **cunada iyo cabitaanada** ayaa intii lagu guda jiray bishii Sabteembar wajahay koror dhan 1.2%. Halka sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada sanad dhamaadka bisha Sabteembar 2019 siyaaday 11.1% marka la barbardhigo sicir bararka Agoosto 2019 ee kabil kabil oo kordhay 8.9%.


**Sicirka qeybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korantada, Gaaska iyo shidaalada kale** ayaa celcelish ahaan waxay kordheen 0.6 % bishii Sabteembar. Halka sicir bararka sanadlaha ee sanad dhamaadka Sabteembar 2019 siyaaday 15.9%, halka sicir bararka kabil-kabil ee Agoosto 2019 uu ahaa 16.5%.

### **Jaantuustaka 3aad: TSD Guud iyo Qeybo si Gaara Loo-eegay**

### All Groups CPI and Selected Groups


#### INDEX

Index = 100 @ 2015



Source: Puntland Statistics Department

**TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir bararka sanadlaha ah ee qeybahaha badeecadaha iyada oo loo-eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Sabteembar 2019.**



### Qaybaha Sicir-kororka ugu ballaraan ee sanadlaha ah uu ku yimid Sanad dhamaadka Sabteembar 2019

- **Sicirka Adeegyada Gaadiidka** ayaa sanadkii ku ekaa agoosto 2019 kordhay 18.3% halka 16.9% ay siyaadeen sanad dhamaadkii bisha Luuliyo 2019.
- **Dharka iyo kabaha** ayaa sanadkii ku dhamaaday Sabteembar 2019 kacay 18.9%, halka uu sanadkii ku dhamaaday Agoosto 2019-kana siyaaday 20.1%. Kor u kacani ayaa ka yimid: dharka oo siyaaday (23.9%) iyo kabaha oo sicirkoodu kordhay (1.7%).
- **Qaybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska iyo shidaalada kale** ayaa celcelis sanad dhamaadka Sabteembar 2019 kordhay 15.9% marka loo barbardhigo sanadk dhamaadkii ka horeeyey ee Agoosto 2019 oo uu kordhay 16.5%. Sicir kororkan waxaa sababay:

kirada guryaha oo siyaaday (14.3%), dayactika guryaha oo kordhay (10.6%) iyo korontada, gaaska iyo shidalada kale oo siyaaday (20.5%).

- **Sicirka Mukhaadaraadka (jaadka tubaakada iyo sigaarka)** ayaa sanadkii ku dhamaaday Sabteembar 2019 celcelis ahaan kacay 14.6% marka loo eego sanadkii ku dhamaaday Agoosto 2019 oo qiimuhu kordhay 16.7%. Sicir kororkaan ayaa loo sababeeyey sicirka tubaakada oo siyaaday (19.6%) iyo jaadka oo isna kacay (6.6%).
- Sicirka qaybta **Caafimaadka** ayaa celcelis ahaan kordhay 13.0% sanad dhamaadka Sabteembar 2019 marka la barbardhigo sanadkii hore ee u dhamaaday Agoosto oo uu jiray koror dhan (10.8%). Sicir kororkaan ayaa loo sababeeyey sicirka Agabka caafimaadka (11.2%), adeegyada mukaan socodka (15.1%) iyo adeegyada daweynta cisbitaalka (8.4%) ayaa ahaa kuwa sicirkoodu kordhay bishii Sabteembar.
- Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha TSD ayaa sanad dhamaadkii Sabteembar 2019 ahaa mid togan marka laga reebo sicirka adeegyada isgaarsiinta oo celcelis ahaan hoos u dhacday 0.1% marka loo barbar dhigo sanad dhamaadkii bishii Agoosto oo uu jiray hoos u dhac dhan 0.3%.

**Tusaha Sicirka Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqaha iyo ka qeybqaadshada sicir bararka ee qeybaha badeecadaha iyada loo-eegayo hanaanka kala soocida badeecadaha.**


**Jadwalka 2: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Sabteembart 2019 iyada oo laga eegayo hanaanka kala soocida badeecadaha (Index = 100 at 2015)**

	Tusaha Sabteembar-2018	Tusaha Agoosto-2019	Tusaha Sabteembar-2018	Tusaha Sabteembar-2019 (Isbedelka%) bilaha ah	Sep-18 ilaa Sep-19 (%Isbedelka Sanadlaha ah)
<b>TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha</b>	75.4	83.7	84.3	0.8	11.9
<b>Cunada iyo Cabitaanada</b>	73.6	80.8	81.8	1.2	11.1
<b>Mukhaadiradka (tubakada, jaadka iyo sigaarka)</b>	76.0	89.4	87.1	-2.6	14.6
<b>Dharka iyo Kabaha</b>	71.2	85.4	84.6	-1.0	18.9
<b>Kirada guryaha Biyaha, Korontada,</b>	74.9	86.3	86.8	0.6	15.9

<b>Gaaska iyo Shidaalada kale</b>					
<b>Agabka Guryaha iyo Dayactirka</b>	79.3	84.3	86.4	2.5	9.0
<b>Caafimaadka</b>	71.5	78.7	80.9	2.7	13.0
<b>Gaadiidka</b>	75.5	90.2	90.2	0.0	19.5
<b>Isgaarsiinta</b>	83.9	83.7	83.8	0.1	-0.1
<b>Dhaqanka iyo Madadaalada</b>	85.2	87.2	89.6	2.7	5.1
<b>Waxbarashada</b>	82.3	85.9	86.0	0.1	4.5
<b>Maqaaxiyaha iyo Huteelada</b>	70.9	70.8	70.9	0.2	0.0
<b>Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah</b>	105.1	114.2	114.4	0.2	8.9

Sababidda sicir bararka sanadlaha ah iyadoo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha.





Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay ku xiirantahay hadba saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.